

IIB MA GALO



FAAFIN

RASMI AH

الرسمية

الجريدة

EE JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad

Muqdisho 29 Jan. 1988

Lr. 2 R 1

Laanta Fafinta Rasmiya ee Madaxtooyada Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QANUUNU: waa 5 shiin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudahooda — dibaddeedana waa Sh. 300. Rukunka la weydiliso wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sader iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydilistaa Laanta Maamulka Fafinta Rasmiya ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wessaradda Lacagta.

K O B N I I N

QAYBTA KOOWAAD
SHARCI

SHARCI Lr. 4 ee 11 Jannaayo 1988,

Oggolaansho wax ka beddelidda Canshuurta
Keenidda

WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA

STATE PRINTING AGENCY

Sharci Lambar 4, taariikh 11 Jan. 1988.
Oggolaansho Wax ka beddelidda Canshuurta Keenidda.

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa wax laga beddelay Canshuurta Keenidda (Dazion d'Importazione) ee ku qoran Xeer-Sharciga lambar 5 ee 11.12.1968 iyo beddeliddi-ka dambeysay (Tariffa Doganale).

Qod. 2aad

Badeecadaha Canshuurtooda wax laga beddelay waa kuwa shaxda ku taxan ee halkaan ku lifaaqan oo ah qeyb ka mid ah Sharcigan.

Qod. 3aad

Waxaa la mideeyey labadii qeybood (Colone) ee Tariifada oo u kala magacawnaa "Fiscale" iyo "Doganale", waxaana loogu yeeri doonaa wixii hadda ka dambeysay "CANSHUURTA KEENIDDA", (Dazio d'Importazione)

Qod. 4aad

Waxaa la baahiyey Sharciga kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 5aad

Sharcigan wuxuu dhacaa xalayaa 1da Jannaayo 1988ka, waxaana lagu soo saarayaa baafinta kasta oo ka soo horjeeda ee Jamhuuriyadda.

Muddigaa 11 Jan. 1988.

MADAXWEYNAHA I.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)